



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Maarso 14, 2022

Ku socota: Dhammaan Shaqaalaha ODDS iyo Hawl-wadaagayaasha (CME-yada, fadlan dadka la wadaaga kuwa ka tirsan adeegyadiina iyo qoysaskooda.)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) iyo Dana Hittle, Agaasimaha Gobolka ee Medicaid ee Ku meel gaarka ah, Maamulka Caafimaadka Oregon

Ujeedada: Macluumaadka cusub ee Waalidiinta ah Daryeel bixiyayaasha Lacagta qaata ee Carruurta Yar yar

Janaayo 2021, ODDS [waxay codsatay oggolaansho](#) ka socda Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) si waalidiinta/mas'uuliyiinta dhashay carruurta qabta naafanimada maskaxda iyo korriinka ee leh baahiyaha dhanka taageerada oo la taaban karo loogu oggolaado in ay noqdaan Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW-yada) ama Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah (DSP-yada). Kala doorashadani waa mid kaliya khuseysa inta lagu jiro Xaalada Caafimaad ee Degdega ah ee Bulshada ee federaalka (PHE) ee loogu talagalay cudurka baahsan ee COVID-19.

Iyada oo ku saleysan codsiyo laga helay waalidiinta ka faa'iideystay oggolaanshaha la siiyay ee hoos yimaada PHE, ODDS iyo OHA ayaa dhawaan la kulmay maamulayaasha CMS si looga wada hadlo kala doorashooyinka jira. Kala doorashooyinkani waxaa ka mid ah barnaamijka cusub ee Medicaid oo lagu shaqeeyo meel ka baxsan qorshaha K ama adeegyada kalkaalisada oo caymiskiisa lagu daboolo qorshaha Medicaid ee gobolka ee loogu talagalay waalidiinta buuxiya shuruudaha. Sida isbeddel kasta oo ku yimaada Medicaid iyo barnaamijka cusub ee Medicaid, kala doorashooyinkani waxay u baahan yihiin in dib eegis lagu sameeyo oo la qiimeeyo saameyntooda miisaaniyadda iyo in la helayo.

Iyada oo taariikhda dhammaadka ee PHE federaalka uu yahay hadda Abriil 16, 2022, tilmaamaha muuqda ayaa ah in CMS ay dhici karto in ay mar kale kordhiso wakhtigaasi la qabtay. Isla marka aan helno ogeysiin rasmi ah, ODDS waxay xiriir ka soo sameyn doontaa taasi si qoysasku wax ugu qorshaysan karaan si waafaqsan. .

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.